CPS

Hanaanka Dacwad-qaadayaasha Maxkamaddeed

The Code for Crown Prosecutors
Somali edition, February 2010

Adeegga Dacwad-qaadidda Maxkamaddeed
(Crown Prosecution Service)
Febraayo 2010

Hanaanka Dacwad-qaadayaasha Maxkamaddeed

Adeegga Dacwad-qaadidda Maxkamaddeed

(Crown Prosecution Service)

Febraayo 2010

1 HORDHAC

1.1 Adeegga Dacwad-qaadidda Maxkamaddeed (Crown Prosecution Service CPS)) waa adeega guud ee dacwad-qaadidda dadweynaha ee Ingiriika iyo Weelishka. Bishii Jannaayo 2010, waxay isku biireen Xafiiska Dacwooyinka ee Cashuuraha iyo Kastamyada (Revenue and Customs Prosecutions Office, RCPO). Adeegga waxaa madax u ah Agaasimaha Dacwad-qaadidda Dadweynaha (Director of Public Prosecution, DPP) kaas oo sidoo kale ah Agaasime Xafiiska Dacwooyinka ee Cashuuraha iyo Kastamyada. DPP wuxuu hawlgalladiisa u sameeyaa si madaxbanaan, oo u hogaansan kor-kala socodka Qareenka guud, kaas oo ay hawlaha adeegga dacwad-qaadidda kala xisaabtamaan Baarlamaanku.

1.2 DPP wuxuu masuul ka yahay samaynta Hannaan Dacwad-qaadayaashu Maxkamadeed (Hannaanka) ku qoran qaybta 10 ee Sharciga Dacwad-qaadidda Falalka dembiyeed ee soo baxay 1985. Hannaanku wuxuu dacwad-qaadayaashu ka hagaa sharciyadda guud ee ay tahay in la isticmaalo marka go'aan laga gaadhayo dacwad-qaadid. Kani waa daabacaaddii lixaad ee Hannaanka, waxayna bedelaysaa dhammaan noocyadii ka horeeyey.

1.3 Hannaankan gudahiisa, erayga "dacwad-qaadis" ("dacwad-qaadayaashu") waxaa loo isticmaalayaa inuu tilmaamo xubnaha adeegga dacwad-qaadidda ee loo qoondeeyey Dacwad-qaadayaasha Maxkamaddeed; dacwad-qaadayaashu xubin ka ah RCPO; Dacwad-qaadayaasha Urureed, kuwaas oo loo qoondeeyey si waafaqsan qaybta 7A ee Sharciga Dacwad-qaadidda Falalka dembiyeed ee soo baxay 1985, ee awooddooda u adeegsada si waafaqsan qaab-tilmaameedka ay samaysay DPP; iyo xubnaha kale ee RCPO kuwaas oo ay qoondaysay DPP kartidiisa Agaasimaha Dacwooyinka ee Cashuuraha iyo Kastamyada ee 2005.

1.4 Hannaankan gudahiisa, odhaahda "booliiska ama dembi-baadhayaasha kale" waxaa loo isticmaalayaa in la tilmaamo xubnaha dhammaan ururada dembi-baadhista, oo ay ka mid yihiin Ururka Dembiyada Waaweyn ee Qorshaysan (Serious Organised Crime Agency) iyo Ururka Xuduudaha UK, kaas oo kiisas u diyaariya una soo bandhiga adeegga dacwad-qaadidda.

1.5 In kasta oo adeegga dacwad-qaadiddu si buuxda ula shaqeeyo booliiska iyo dembi-baadhayaasha kale, haddana way ka madaxbannaan yihiin. Madaxbanaanida dacwad-qaadayaashu waa muhiimad dastuur oo aasaasi ah.

1.6 Adeegga dacwad-qaadidda wuxuu iskaashi la sameeyaa ururada dembi-baadhista iyo dacwad-qaadidda ee xukun-qaadayaasha kale si ay suurtogeliyaan su'aal weydiinmaha iyo dacwad-qaadiddaha Ingiriiska iyo Weeliska gudahooda iyo dibaddaba.

1.7 Sida waafaqsan qaybta 36(2) ee Sharciga Canshuuraha iyo Kastamyada ee 2005, dacwad-qaadayaasha ka socda RCPO ee ku shaqaynaya awooddaas waa inay ahmiyad siiyaan Hannaanka Dacwad-qaadayaasha Maxkamaddeed ee ay soo saartay DPP.

1.8 Hannaankan gudahiisa, erayga “eedaysane” (“suspect”) waxaa loo isticmaalayaa inuu tilmaamo qof aan weli ahayn mid lagu qaaday hanaan-hawleed dembi oo rasmi ah; erayga “mudaaci” (“defendant”) waxaa loo isticmaalayaa qof la xukumay ama sharciga la hor keenay; erayga “dembiile (“offender”) waxaa loo isticmaalayaa inuu tilmaamo qof qirtay dembi uu galay oo u sheegay saarkaal booliis ama dembi-baadhe kale ama dacwad-qaade, ama ay maxkamadda sharciga ah ku heshay dembi.

1.9 Hannaanku waa mid ka mid ah labo dukumeenti oo la soo bandhigay oo ay dadweynuhu heli karaan, oo sharax ka bixinaya ujeeddada iyo shaqada adeegga dacwad-qaadidda. Kan labaadna waa buug-yaraha Heerarka Tayo ee Xuddunta ah (Core Quality Standards booklet). Hannaanka oo keliya ayaa sharcigu soo saaray.

1.10 Labadaasi marka laysku daro, waxay dadweynaha ogaysiinayaan waxa ay dacwad-qaadayaashu sameeyaan; sida ay u gaadhaan go’aannadooda; iyo heerka adeeg ee adeegga dacwad-qaadidda u heelan yahay inuu siiyo mid kasa oo ka mid ah dhinacyada muhiimka ah ee shaqadiisa.

1.11 Hannaanka iyo buug-yaraha Heerarka Tayo ee Xuddunta ah waxaa laga heli karaa rugaha wada xidhiidh ee lagu taxay jeldiga dambe ee buug-yarahan.

2 MABAADII'DA GUUD

2.1 Go'aanka ah in dacwad-la qaado ama in shakhsi loo sameeyo xal-gaadhid maxkamadda ka baxsan waa talaabo weyn/muhiim ah. Dacwad-qaadidi cadaalad ah oo waxtar lihi waxay lama huraan u tahay ilaalinta sharciga iyo kala dambaynta. Waa waajibaadka dacwad-qaadayaasha inay hubiyaan in qofka dacwadda lagu qaadayaa yahay qofkii saxda ahaa, laguna qaado falka dembi ee saxda ah iyo in dembiilayaasha sharciga la hor keeno mar kasta oo ay suurtogal tahay. Go'aanada Hawlaha kiisaska ee si caddaalad, dhexdhexaadnimo iyo sharaf leh loo gaadho waxay caawimo ka noqdaan in caddaalad loo sameeyo dulmanayaasha, markhaatiyaasha mudaaciyaasha iyo dadweynaha.

2.2 Waa waajibaadka dacwad-qaadayaasha inay dib-uga fiirsadaan, si ay talobixin uga bixiyaan iyo inay dacwad uga qaadaan kiisaska ama inay dembiilaha siiyaan xal-gaadhid munaasib ah oo maxkamadda ka baxsan. Dacwad-qaadayaashu waa inay hubiyaan in sharciga si sax ah oo isticmaalay; in dhammaan cadaymaha la xidhiidha la keenay maxkamadda horteeda; iyo in waajibaadka soo bandhigidda loo raacay, si waafaqsan sharciyadda lagu qoray Hannaankan.

2.3 In kasta oo ay tahay in kiis walba iskii looga fiirsado, iyadoo loo eegayo xaqiiqooyinkiisa iyo wax-ku-oolnimadiisa, haddana waxaa jira sharciyo guud oo khuseeya dariiqa ay tahay in dacwad-qaadayaashu u wajahaan kiis walba.

2.4 Dacwad-qaadayaashu waa inay kuwo cadaali ah oo madaxbaan ahaadaan, kuna salaysan xaqiiqada kiiska. Waa in aanay ogolaan in wax ra'yi shakhsiyeed ah oo la xidhiidha asliyadda ama meesha uu qof ka soo jeedo, jinsiga, kala dhantaalnaan, cimriga diinta ama caqiidada, ra'yiga siyaasaddeed, dookha galmo, ama aqoonsiga jinsiyeed ee eedaysanaha, dulmanaha ama wax markhaati ah ay saamayn ku yeelato go'aanadood. Sidoo kale waa in aanay dacwad-qaadayaasha saamayn ku yaalan cadaadis aan sax ahayn ama loo baahnayn oo meel uun kaga yimaada. Dacwad-qaadayaashu waa inay had iyo goor wax u qabtaan si ay ku jirto cadaalad oo aan ujeedadeeda keliya ahayn in xukun la qaado.

2.5 Adeegga dacwad-qaadidda waa maamul dadweyne oo la xidhiidha arimaha qaynuunka khuseeya sinaanta ee hadda jira. Dacwad-qaadayaashu waxay ku shaqeeyaan masuuliyadaha lagu sheegay qaynuunkan.

2.6 Adeegga dacwad-qaadiddu sidoo kale waa maamul dadweyne oo la xidhiidhsan Sharciga Xuquuqda Bini-Aadmiga ee 1998. Dacwad-qaadayaashu waa inay marxalad walba oo kiisku marayo u isticmaalaan Sharciga Yurub ee Xuquuqda Bini-Aadamka, si waafaqsan Sharciga Xuquuqda Bini-Aadmiga. Dacwad-qaadayaashu waa inay sidoo kale u hogaansamaan wixii hagitaan ah ee uu soo saaro Qareenka Guud (Attorney General) iyo xeerarka adeegga dacwad-qaadidda ee la soo saaray iyadoo la metalayo DPP. Waa inay sidaa si le'eg u hogaansamaan Sharciyadda Hanaan-hawleedka Dembiyada ee hadda jira.

3 GO'AANKA IN DACWAD LA QAADO IYO IN KALE

3.1 Kiisaska waaweyn ama dhinacyada badan leh, dacwad-qaadayaasha ayaa go'aan ka gaadha in qof lagu xukumo fal dembi iyo in kale, iyo haddii ay sidaa tahay, waxa uu falka dembi noqon doono. Waxay go'aanadooda u gaadhaan si waafaqsan Hagahan iyo Hagaha DPP ee Debmi-ku qaadida. Booliisku wuxuu isticmaalaa sharciyo kuwaas la mid ah, marka ay go'aan ka gaadhayaan in qof dembi lagu xukumo ama sharciga la hor keeno kiisaska ay booliisku mas'uul ka yihiin.

3.2 Booliiska iyo dembi-baadhayaasha kale waxay mas'uul ka yihiin inay su'aalo weydiin ku sameeyaan eedayn ah in laga yaabo in lagu kacay fal-dembi. Kiis kasta oo dacwad-qaadayaashu ka helaan booliiska ama booliiska ama dembi-baadhayaasha kale dib uga fiirsi ayaa lagu sameeyaa. Dacwad-qaadayaashu waa inay xaqiijiyaan inay haystaan dhammaan warbixinaha ay u baahan yihiin si ay u gaadhaan go'aan xog ku salaysan oo ku saabsan sida ugu wanaagsan ee kiiska loogu hawlgalo. Inta badan tan waxaa ka mid noqon doona in dacwad-qaadayaashu booliiska iyo dembi-baadhayaasha kale siiyaan hagitaan iyo talobixin, kuwaas oo ku saabsan khadadka su'aal weydiineed, baahiyaha cadaymeed, iyo gargaar la xidhiidha wixii hanaan-hawleed xukunka ka hor ah, inta ay dembi-baadhistu socoto oo dhan iyo qaab-hawleedka dacwad ku qaadidda. Hase yeeshee, dacwad-qaadayaashu ma jiheyn karaan booliiska ama dembi-baadhayaasha kale.

3.3 Dacwad-qaadayaashu waa inay aqoonsadaan oo haddii ay suurtogal tahay ay raadiyaan in la saxo dhaliilaha cadaymaha, laakiin sida waafaqsan Baadhitaanka Bar-cabiraad (arag qaybta 5), waa inay isla markiiba joojiyaan kiisaska aan buuxin shuruudaha marxaladda cadaymaha ee Baadhitaanka Buuxa ee Hanaanka (arag qaybta 4) ee aan lagu xoojin karin baadhitaan dheeraad ah oo la sameeyo, ama haddii ay cadahay in danaha dadweynahu aanay u baahnayn in dacwad la qaado (arag qaybta 4). In kasta oo dacwad-qaaduhu uu inta badan ka fiirsado cadaymaha iyo warbixinaha ay bixiyaan booliiska iyo dembi-baadhayaasha kale, eedaysanaha ama cida metelaysa waxaa laga yaabaa inay dacwad-qaadaha u soo gudbiyaan cadaymo ama warbixino, iyagoo u sii marinaya booliiska ama dembi-baadhayaasha kale, xukunka ka hor, si ay caawimo uga noqdaan go'aanka dacwad-qaadaha.

3.4 Dacwad-qaadayaashu waa inay keliya oo dacwad-qaadid bilaabaan ama mid hore sii wadaan marka uu kiisku ka gudbo labada marxaladood ee Baadhitaanka Buuxa ee Hanaanka (arag qaybta 4). Waxaa keliya oo ka soo hadha marka Baadhitaanka Bar-cabiraad (arag qaybta 5) laga yaabo in loo isticmaalo halkii la soo jeediyey in maxkamadda dalab loo sameeyo, si eedaysanaha xabsiga loogu hayo xukunka ka bacdi, oo cadaynta loogu baahan yahay in la isticmaalo Baadhitaanka Buuxa ee Hanaanka aan weli la heli karin.

3.5 Dacwad-qaadayaashu waa inay hubiyaan in aan dacwad-qaadid la bilaabin ama mid hore la sii wadin marka ay in sidaa la sameeyo ay maxkamaddu u arki doonto mid dulmi ama cadaalad daro ah, ayna hanaan-hawleedka maxkamadda ceeb u keeni karto.

3.6 Dib-uga fiirsigu waa hanaan-hawleed dacwad-qaadayaashuna waa inay xisaabta ku daraan wixii isbedelo ah ee yimaada marka uu kiisku sii socdoba. Mar kasta oo ay suurtogal tahay, waa inay ugu horayn la hadlaan dembi-baadhaha haddii ay ka fekerayaan inay bedelaan xukunka ama inay joojiyaan kiiska. Dacwad-qaadayaasha iyo dembi-baadhayaasha waxay u wada shaqeeyaan si buuxda, laakiin masuuliyadda kama dambaysta ah ee go'aanka ah in kiis la bilaabo ama la sii wado waxaa iska leh adeegga dacwad-qaadidda.

3.7 Baarlamaanka ayaa go'aamiyey in tiro kiisas waaweyn/aad khatar u ah ama dembiya xasaasi ah oo xadidan oo keliya maxkamad la hor geeyo iyagaoo ay isla ogolaadeen DPP. Kuwaas waxaa la yidhaahdaa kiisas "ogolaansho" (consent" cases). Kiisaskaa iyaga ah, DPP ama dacwad-qaadayaasha ka socda waxay isticmaalaan Hanaanka marka ay go'aan ka gaadhayaan in ogolaansho dacwad-qaadid la bixiyo iyo in kale.

4 BAADHITAANKA BUUXA EE HANNAANKA

4.1 Baadhitaanka Buuxa ee Hannaanku wuxuu ka kooban yahay labo marxaladood: (i) marxaladda cadaymaha; oo ay daba socoto (ii) marxaladda danaha dadweynaha.

4.2 Kiisaska intooda badan, dacwad-qaadayaashu waa inay keliya oo go'aan ka gaadhaan in dacwad-qaadid la sameeyo ka dib marka dembi-baadhistu dhammaato ee dhammaan cadaymaha la heli karey laga fiirsaday. Hase yeeshee, waxaa jiri doona kiisas ay cadahay, ka hor ururinta iyo ka fiirsiga dhammaan cadaymaha ay u badan tahay, in danaha dadweynahu aanu u baahnayn dacwad-qaaid. Tusaalayaashaa naadirka ah, dacwad-qaadayaasha waxaa laga yaabaa inay go'aamiyaan in aan kiisku halkaa ka sii gudbin.

4.3 Dacwad-qaadayaashu waa inay go'aanka noocaas ah qaataan oo keliya marka ay ku qanacsan yihiin in baaxadda guud ee dembiilenimo la ogaadey oo ay awoodaan inay qiimayn buuxda oo xog ku salaysan sameeyaan ku sameeyaan danaha dadweynaha. Haddii dacwad-qaadayaashu aanay hayn warbixino ku filan oo ay go'aankaas ku gaadhaan, waa in dembi-baadhistu sii socotaa, go'aankana xiligaa xili ka dembeeya loo sameeyaa si waaafaqsan Baadhitaanka Buuxa ee Hannaanka ee lagu qoray qaybtan.

4.4 Dacwad-qaadayaashu waa inay raacaan wixii hagayaal ah ee ay soo saartay DPP, si ay u hubiyaan in go'aanada kiisaskaasi ay yihiin kuwo munaasib ah oo sax ah.

MARXALADDA CADAYMAHA

4.5 Dacwad-qaadayaashu waa inay ku qancaan in ay jiraan cadaymo ku filan si ay u sameeyaan saadaal suurtogal ah oo xukun loogu qaado eedaysane walba oo dembi lagu oogo. Waa inay ka fekeraan waxa laga yaabo inuu kiiska difaaciisu noqdo, iyo sida ay ugu badan tahay inay saamayn ku yeelato saadaasha xukun ku qaadidda. Kiiska aan ka gudbin marxaladda cadaymaha waa in aan la sii wadin, iyadoo aan loo eegayn weynaantiisa ama xasaasinimadiisa.

4.6 Saadaal suurtogal ah oo xukun ku qaadid waa baadhitaan xaqiiqada kiiska lagu dhaqmayo, kaas oo ku salaysan qiimaynta uu dacwad-qaaduhu ku sameeyo wixii cadaymo iyo warbixino ah ee uu ka hayo mudaaciga ee laga yaabo inuu soo gudbiyo eedaysanahu. Taa macnaheedu waa in guddi maxkamaddeed, koox garwadeeno ah ama xaakim xaqiiqada raacaya, dhexdhexaad ah oo macquul ah oo keligood kiiska dhegaysanaya, oo si fiican loo jiheeyey kuna dhaqmaya si sharciga waafaqsan, ay u badan tahay in ay mudaaciga xukun dembiga lagu soo oogayo ah ku qaadaan. Kani waa baadhitaan ka duwan ka ay maxkamaddaha dembiga laftoodu ay tahay inay isticmaalaan. Maxkamad waxaa laga yaabaa inay xukun qaado keliya haddii ay hubto in uu mudaacigu dembiile yahay.

4.7 Marka la go'aaminayo in ay jirto caddayn ku filan oo dacwad-qaadid lagu sameeyo iyo in kale, dacwad-qaadayaashu waa inay ka fiirsadaan in caddaynta la isticmaali karo iyo in kale iyo inay tahay mid lagu kalsoonaan karo iyo in kale. Waxaa jiri doona kiisas badan oo aan caddayntu keenin wax welwel ah. Laakiin waxaa jiri doona kiisas caddayntu laga yaabo in aanay u xooganayn sidii ay markii hore u muuqatey. Gaar ahaan, dacwad-qaadayaashu waxay u baahan doonaan inay ka fiirsadaan arrimaha soo socda.

Caddaynta ma laga isticmaali karaa maxkamadda gudaheeda?

a Miyay u badan tahay in maxkamaddu cadaynta ka reebi doonto? Waxaa jira xeerar sharciyeed oo laga yaabo inuu macnahoodu noqdo in cadaymo u muuqda inay yihiin kuwo khuseeya aan laga bixin karin dacwad-maxkamadeedda dhexdeeda. Tusaale ahaan, ma laga yaabaa in cadayn laga reebo, sababta loo reebayaana tahay qaabka cadayntaa lagu soo helay?

b Cadayntu ma dadku meelahaas ka lahaayeen baa? Haddii haa, miyay u badan tahay in maxkamaddu ogolaato in loo soo bandhigo si hoos timaada mid ka mid ah ka-reebanayaasha ogolaanaya in cadaynta noocaas ah maxkamadda dhexdeeda laga bixiyo?

c Miyaa cadayntu khusaysaa dabeecadda xun ee eedaysanaha? Haddii haa, miyay u badan tahay in maxkamaddu ogolaato in la soo bandhigo?

Cadayntu ma tahay mid lagu kalsoon yahay?

d Maxaa sharaxaad ah oo uu bixiyey eedaysanuhu? Ma u badan tahay in maxkamaddu u aragto caqligal marka la ogaado gebi ahaan cadaymaha? Cadaymuhu ma taageerayaan sharaxaad dembi la'aaneed?

e Miyay jirtaa cadayn laga yaabo inay taageerto ama khilaafto ku kalsoonaanta qirashada? Ku kalsoonaanteeda miyay saamayn ku yeelayaan arrimaha sida heerka fahan ee eedaysanaha?

f Miyay u badan tahay in su'aali ka timaado aqoonsiga eedaysanaha? Cadaynta eedaysanaha aqoonsigiisu ma tahay mid xoogan? Ma la sameeyey hanaan-hawleedkii aqoonsiga ee munaasibka ahaa? Haddii maya, maxaa loo samayn waayey? Miyaa wixii ku guuldaraysi ah ee in aan la samayn hanaan-hawleedkii aqoonsiga ee munaasibka ahaa keeni doontaa in cadaynta aqoonsiga layska dhaafo?

g Ma welwel ayaa ka jira sugnaanta, ku kalsoonaanta ama wax-ku-oolnimada cadaynta mid ka mid ah markhaatiyaasha?

h Miyay jirtaa cadayn dheeraad ah oo booliiska ama dembi-baadhayaasha kale si macquul ah loo weydiin karo inay helaan, cadayntaas oo laga yaabo inay taageerto ama ciladayso waxa uu markhaatigu soo gudbinayo?

i Miyaa mid ka mid ah markhaatiyaashu qabaa wax muraad ah oo laga yaabo inuu saamayn ku yeesho dareenkiisa ku wajahan kiiska?

j Miyaa mid ka mid ah markhaatiyaasha hadda ka hor lagu qaaday xukun la xidhiidha ama xal-gaadhid maxkamadda ka baxsan, taas oo laga yaabo inay saamayso ku-kalsoonaantiisa/kalsoonaanteeda?

k Miyay jirtaa cadayn dheeraad ah oo la heli karo, oo taageeri karta daacadnimada cadaynta hadda la hayo?

4.8 Haddii laga fekero in ay caawimo noqonayso in qiimayn lagu sameeyo ku kalsoonaanshaha markhaati' cadayn ama in si ka fiican loo fahmo cadayn dhinacyo badan leh, waa in uu dacwad-qaadaha si munaasib ah loo tababaray oo la ansixiyey sameeyaa waraysi dacwadda ka hor ah oo uu markhaatiga ula yeesho si waafaqsan Hannaanka hawlgal ee khuseeya.

4.9 Dacwad-qaadayaashu waa in aanay iska indha tirin cadayn sababta oo ah in aanay hubin in la isticmaali karo ama lagu kalsoonaan karo. Laakiin waa inay si buuxda ugu fiirsadaan marka ay go'aaminayaan in ay jirto saadaal macquul ah oo xukun-qaadid.

MARXALADDA DANAHA DADWEYNAHA

4.10 Sannadkii 1951, Sir Hartley Shawcross, oo ahaa Qareenka Guud, ayaa odhaahdii caanka ahayd ka sameeyay danaha dadweynaha: *" weligeed ma ahayn sharciga wadankan – waxaan rajaynayaa in aanay weligeed noqon dooni n – in falal dembi oo laga shakisan yahay si toos ah isla markiiba dacwad loogu qaado".* Wuxuu intaa raaciyey in ay jiro dacwad-qaadid: "*mar kasta oo ay u muuqato in falka dembi ama cawaaqibka samayntiis ay tahay qaab ah in dacwad-qaadidda la qaderiyo, halkaas oo loogu baahan yahay danaha dadweynaha*" Doodii Guriga Guurtida (House of Commons Debates), ee Dufcaddii 483, 29 Jannaayo 1951. Qaabkan ayaa Qareenada Guud ansixiyeen ilaa iyo xiligaa.

4.11 Sidaas oo kale, haddii ay jirto cadayn ku filan oo suurtogelinaysa dacwad-qaadid ama in la bixiyo xal-gaadhid maxkamadda ka baxsan, dacwad-qaadayaashu waa inay sii wadaan inay ka fiirsadaan in dacwad-qaadid loogu baahan yahay danaha dadweynaha iyo in kale.

4.12 Dacwad-qaadid ayaa badiyaa dhici doonta ilaa haddii mooyee uu dacwad-qaade hubo in ay jirto arrimo danaha dadweynaha ah oo ka hor imaanaya dacwad-qaadid, kuwaas oo ka ahmiyad badan kuwo taageeray in la dacwad la qaado, ama haddii mooyee dacwad-qaaduhu uu ku qanacsan yahay in laga yabo in aan danta dadweynaha si wanaagsan loogu adeegin, tusaalaha hore, in la siiyo dembiilaha fursad ah in arrinta wax lagaga qabto xal-gaadhid maxkamadda ka baxsan (arag qaybta 7). Marka uu falka dembi ka sii weyn yahayba ama qoraalada keydsan ee hab-dhaqanka dembiyeed ee dembiilaha ka sii badan yihiinba, waxay uga dhowdahay in dacwad-qaadid loogu baahan doono si danaha dadweynahu ku jirto.

4.13 Qiimayn ku samaynta danaha dadweynaha maaha oo keliya in la isku daro tirada arrimaha dhinac walba, dabadeedna la eego dhinaca tiro badan. Kiis kasta waa in looga fiirsadaa iyadoo la eegayo xaqiiqadiisa iyo wax-ku-oolnimadiisa. Dacwad-qaadayaashu waa inay go'aamiyaan muhiimadda mid kasta oo ka mid ah danaha dadweynaha ee xaaladda kiis kasta, ayna markaa sameeyaan qiimayn guud. Waxaa suurtogal ah in ay hal arrin laga yaabo inay ka miisaan badato dhawr arrimood oo dhinaca kale ee ka soo horjeeda ah. In kasta oo laga yaabo inay jiraan arrimo danaha dadweynaha ah oo ka hor imaanaya in dacwad-qaadid lagu sameeyo kiis gaar ah, dacwad-qaadayaashu waa inay ka fiirsadaan in haddana ay tahay in dacwad-qaadid la sii wado iyo in kale iyo in arrimahaas maxkamadda horteeda la keeno si looga fiirsado marka xukun la qaadayo.

4.14 Arrin la'aanteed macnaheedu maaha in loo arko inay tahay mid ka soo horjeeda dhinaca kale. Tusaale ahaan, in aan "falka dembi kooxi samayn" ka dhigi mayso "arrin taageeraysa dacwad-qaadid" inay isu rogto "arrin ka hor imaanaysa dacwad-qaadid".

4.15 Waxaa hoos lagu taxay qaar caam ah oo ka mid ah arrimaha danaha dadweynaha oo ay tahay in laga fiirsado marka la go'aaminayo talaabada ugu munaasabsan ee ay tahay in la qaato. Liiska soo socda ee arrimaha danaha dadweynaha maaha kuwo intaa ku kooban, kiis walbana waa in looga fekeraa xaqiiqadiisa iyo wax-ku-oolnimadiisan.

Qaar ka mid ah arrimaha caamka ah ee danaha dadweynaha ee taageeraya dacwad-qaadid

4.16 Dacwad-qaadid ayay u badan tahay in loo baahdo haddii:

a xukunku uu u badan yahay inuu keeno ciqaab weyn /xabsi dheer;

b xukunku uu u badan yahay inuu keeno amar maxkamadeed oo ka weyn kan uu dacwad-qaaduhu awoodo inuu samaayo isagoo adeegsanaya digniinta shuruudaysan;

c falka dembi uu ku lug lahaa isticmaal hub ama hanjabaad rabsho;

d falka dembi laga galay qof bulshada u adeegaya (tusaale ahaan, xubin ka tirsan gargaarka degdegga ah; booliis ama sarkaal ilaalo xabsi ah; xirfad-bixiye adeeg gaadiid dadweyne);

e falka dembi uu ahaa mid la sii qorsheeyey;

f falka dembi ay kooxi samaysay;

g falka dembi lagu hor sameeyey ama lagu sameeyey meel u dhow ilme yar;

h falka dembi uu ku salaysnaa nooc takoorid ah, oo dulmahana lagu takoorayey asliyadda ama meesha uu qof ka soo jeedo, jinsiga, kala dhantaalnaan, cimriga diinta ama caqiidada, ra'yiga siyaasaddeed, dookha galmo, ama aqoonsiga jinsiyeed; ama uu eedaysanuhu muujiyey colaad ku wajahan dulmanaha oo ku salaysan mid ka mid ah fekeradaas;

i falka dembi loo sameeyey si loogu golgol xaadho dembi kaa ka sii weyn;

j dulmanaha falka dembi uu ku sugnaa xaalad nugul/daciif ah, eedaysanuhuna uu taas ka faa'iidaystey;

k ay jirtey arrin musuqmaasuq dulmanaha kaga ah qaabka falka dembi loo sameeyey;

l ay jireen farqi weyn oo cimri oo eedaysanaha iyo dulmanaha ah, eedaysanuhuna uu taas ka faa'iidaystey;

m ay jirtey farqi heer fahan oo eedaysanaha iyo dulmanaha ah, eedaysanuhuna uu taas ka faa'iidaystey;

n eedaysanuhu uu hayey xil awood leh ama aaminaad leh uuna taas ka faa'iideystey;

o eedaysanuhu uu ahaa hogaamiya kooxeed falka dembi oo la qorsheeyey;

p eedaysanaha hadda ka hor lagu xukumay xukuno hore ama xal-gaadhid maxkamadda ka baxsan oo hore oo lagaga xukumay fal dembi oo la xidhiidha falka dembi ee hadda;

q eedaysanaha lagu soo oogey inuu galay fal dembi oo ku xad gudbaya amarka maxkamadda;

r ay dacwad-qaadiddu saamayn weyn oo wanaagsan ku yeelanayso ilaalinta kalsoonida bulshada;

s ay jiraan sababo lagu aamino in falka dembi ay u badan tahay in la sii wado ama lagu soo celceliyo.

Qaar ka mid ah arrimaha caamka ah ee danaha dadweynaha ee ka hor imaanaya dacwad-qaadid

4.17 Dembi-qaadiddu waxay u badan tahay inaan loo baahan haddii:

a ay u badan tahay in maxkamaddu xukumi doonto ciqaab fudud;

b weynaanta iyo cawaaqibka samaynta fal-dembi si munaasib ah wax looga qaban karo xal-gaadhid maxkamadda ka baxsan, oo uu eedaysanahu aqbalo oo uu u hogaansamo (arag qaybta 7);

c eedaysanuhu uu maray dariiq hawlqabad munaasib ah oo sharciyeed, ama ciqaab ama ganaax bulsho oo khuseeya, kaas oo sii socda ama kaas oo si lagu qanacsan yahay loo soo gabagabeeyey, kaas oo si ku filan wax uga sheegaya weynaanta/khatarnimada dembi samaynta iyo ku xadgudbidda aaminaada ku lug leh;

d falka dembi loo sameeyey khalad dhaba ahaan ama fahan la'aan;

e khasaaraha ama waxyeelada lagu tilmaami karo mid sahlan ayna ka dhalatay dhacdo keliya, gaar ahaan haddii ay ku timi aragti/feker xumo;

f ay jirtey mudo dheer oo u dhexaysey xiligii uu dhacay falka dembi iyo taariikhda dacwadda maxkamadda, ilaa haddii mooyee:

- falka dembi oo weyn/khatar ah;
- habsaanka uu gebi ahaan ama qayb ahaan keenay eedaysanahu;
- falka dembi uu dhowaan uun soo if-baxay;
- dhinacyo badnaanta falka dembi ay keentay in ay jirtey dembi-baadhis dheer; ama
- qaabab cusub oo dembi-baadhiseed la isticmaalay si dib loogu baadho dembiyo aan hore loo xalin, taasina ay keentay in eedaysane la aqoonsaday;

g dacwad-qaadid waxay u badan tahay inay saamayn xun ku yeelato caafimaadka jidheed ama maskaxeed ee dulmanaha, had iyo goor in maskaxda lagu hayo weynaanta/khatarsanaanta falka dembi iyo ra'yiyada dulmanaha ee la xidhiidha saamaynta ay dacwad-qaadid ku yeelayso caafimaadkiisa/keeda jidheed ama maskaxeed;

h eedaysanuhu oo door aan weynayn ka qaatay samaynta falka dembi;

i eedaysanuhu uu bixiyey khasaarihii ama waxyeeladii la geystey (laakiin eedaysanuhu maaha inuu ka badbaado dacwad-qaadid ama xal-gaadhid maxkamadda ka baxsan iyadoo sababta keliya ee uu sidaa u yeelayaana ay tahay in inuu/inay bixiyey magdhaw ama bixiyey xaddigii lacageed uu/ay sharci daradda ku qaatay);

j eedaysanuhu yahay, ama xiligii uu falka dembi samaynayey uu qabey dhibaato caafimaad maskaxeed ama jidheed oo weyn, ilaa haddii mooyee falka dembi uu khatar yahay ama ay si dhab ah suurtogal u tahay in mar kale lagu celiyo. Dacwad-qaadayaashu waxay isticmaalaan hagayaasha Xafiiska Arrimaha Gudaha (Home Office) ee ku saabsan sida loogu hawlgalo dembiilayaasha qaba cilad xagga maskaxda ah, waana inay isu miisaamaan cudurka maskaxeed ama jidheed ee eedaysanaha iyo baahida badbaado-ilaalinta dadweynaha ama dadka shakhsiyaadka noocaas ah siinaya adeegyo daryeel;

k dacwad-qaadiddu waxaa laga yaabaa inay u baahato faahfaahinaha in dadweynaha loo soo bandhigo inay dhibaato u keento ilaha warbixinaha, cilaaqaadka caalamiga ah ama ammaanka qaranka.

Ra’yiga dulmanayaasha ama qoysaskooda

4.18 Marka la go’aaminayo in dacwad-qaadid dadweynaha dantiisa ah loo baahan yahay iyo in kale, dacwad-qaadayaashu waa inay xisaabta ku daraan wixii ra’yi ah ee uu dulmanahu soo jeediyo ee la xidhiidha saamaynta uu falka dembi ku yeeshay. Kiisaska munaasibka ku ah, tusaale ahaan, diliinka/qud-gooyada ama marka uu dulmanahu yahay ilme yar ama qof weyn oo aan xiskiisu dhamayn sida lagu qeexay Sharciga Kartida Xagga Maskaxda ee 2005, dacwad-qaadayaashu waa inay xisaabta ku daraan wixii ra’yi ah ee ay dulmanaha qoyskiisu soo jeediyaan.

4.19 Hase yeeshee, adeegga dacwad-qaadiddu ma metalo dulmanayaasha ama qoysaskooda si la mid ah sida ay qoreenadu u metalaan dadka ay u doodayaan, dacwad-qaadayaashuna waa inay sameeyaan ra’yi guud oo dadweynaha dantooda ah.

4.20 Haddii ay dacwad-qaadayaashu leeyihiin masuuliyad ah inay go’aankooda u sharaxaan dulmanaha, tusaale ahaan marka ay kiis joojiyaan ama ay wax weyn ka bedelaan dacwadda kiiska, waa inay u hogaansamaan Hannaanka hawlgal ee Dulmanayaasha Dembiga iyo dhammaan Hagayaasha CPS ee la xidhiidha. Dacwad-qaadayaashu waa inay raacaan wixii hanaan-hawleedyo ah ee laysku raaco, oo ay ku jiraan in lagu dhaqmo wixii wakhti mudaysan ah ee ay tahay in go’aannadaas lagu ogaysiiyo dulmanaha.

5 BAADHITAANKA BAR-CABIRAAD

5.1 Dacwad-qaadayaashu waxay isticmaali doonaan Baadhitaanka Buuxa ee Hanaanka mar kasta oo ay suurtogal tahay. Hase yeeshee, waxaa jiri doona kiisas uu eedaysanahu leeyahay khatar weyn oo damiineed haddii la sii daayo cadaymaha oo dhanna lama heli karo xiliga ay tahay in xabsiga laga sii daayo, ilaa in la xukumay mooyee.

5.2 Kiisaska noocaas ah, dacwad-qaadayaashu waxaa laga yaabaa inay isticmaalaan Baadhitaanka Bar-cabiraad si ay u sameeyaan go'aan xukun.

Marka laga yaabo in Baadhitaanka Bar-cabiraad la isticmaalo

5.3 Baadhitaanka Bar-cabiraad waxaa keliya oo la isticmaali karaa marka dacwad-qaaduhu uu ku qanacsan yahay in dhammaan afarta shuruudood ee soo socda la buuxiyey:

a in ay jirto cadayn ku filan oo hadda la hayo, oo la isticmaali karo xiliga marxaladda cadaymaha ee Baadhitaanka Buuxa ee Hanaanka; iyo

b in ay jiraan sababo macquul ah oo lagu aaminsan yahay in cadaymo dheeraad ah la hlei doono, oo lagu heli doono muddo macquul ah gudaheed; iyo

c weynaanta/khatarnimada iyo cawaaqibka kiiska tahay mid keenaysa samaynta go'aan xukun oo isla markaaba ah; iyo

d inay jiraan sababo wax-ku-ool ah oo sii socda oo lagaga soo horjeesto damiin, si waafaqsan Sharciga Damiinka ee 1976 (Bail Act 1976) iyo in dhammaan cawaaqibyada kiisku dalab lagu joojiyo damiin laga yaabo in si sax ah loo sameeyo.

5.4 Marka mid ka mid ah shuruudaha kor ku qoran aan la buuxin, Baadhitaanka Bar-cabiraad lama isticmaali karo eedaysanahana lama xukumi karo. Kiiska noocaan ah waa in dib loogu celiyaa sarkaalka xabsiga, kaas oo go'aamin doona in qofka lagu sii hayn doono xabsiga ama damiin lagu sii daayo, shuruud ama shuruud la'aan.

5.5 Waxaa jira labo qaybood oo ah ka fekerid cadaymeed oo Baadhitaanka Bar-cabiraad.

Qaybta hore ee Baadhitaanka Bar-cabiraad – ma jiraa tuhun macquul ah?

5.6 Ugu horayn, dacwad-qaaduhu waa inuu ku qanacsan yahay in ay jirto ugu yaraan tuhun macquul ah oo ah in qofka la xukumayaa uu sameeyey falka dembi.

5.7 Marka la go'aaminayo in uu jiro tuhun macquul ah iyo in kale, dacwad-qaaduhuna markaa la hayo. Tani waxay ahaan kartaa qoraallo markhaatiyaal,

waxyaalo ama warbixino kale, haddii uu markaa dacwad-qaaduhu taas ku qanacsan yahay:

a ma khusaysaa; iyo

b ma tahay mid laga dhigi karo qaab la aqbali karo oo maxkamadda horteeda laga soo bandhigo; iyo

c kiiska loo isticmaali karo.

5.8 Haddii qaybtan Baadhitaanka Bar-cabiraad lagu qanco, dacwad-qaaduhu waa inuu u sii gudbaa qaybta labaad ee Baadhitaanka Bar-cabiraad.

Qaybta labaad ee Baadhitaanka Bar-cabiraad – ma jiri doontaa saadaal macquul ah oo xukun-ku-qaadid ah?

5.9 Marka labaad, dacwad-qaaduhu waa inuu ku qanacsan yahay inay jirto sababo macquul ah oo lagu aaminsan yahay in dembi-baadhista sii socotaa ay keeni doonto cadayn dheeraad ah, taas oo lagu helayo wakhti mudaysan oo macquul ah gudaheed, si marka dhammaan cadaymaha laysu geeyo ay awoodi doonaan inay keenaan saadaal macquul ah oo xukun-ku-qaadid, lagu samaynayo si waafaqsan Baadhitaanka Buuxa ee Hanaanka.

5.10 Cadaynta dheeraadka ahi waa inay ahaataa mid la aqoonsan karo ee aanay noqon wax la sheegsheegayo oo keliya.

5.11 Marka go'aan lagu gaadhayo si hoos imaanaysa qaybtan labaad ee Baadhitaanka Bar-cabiraad, dacwad-qaaduhu waa inuu ka fekeraa:

a nooca, baaxadda iyo aqbalidda wixii cadayn dheeraad ah ee ay u badan tahay in la heloiyo saamaynta ay kiiska ku yeelan doonto;

b xukunka ay dhamaan cadaymuhu taageerayaan;

c sababaha aan cadaynta xiliga markaa la joogo loo heli karin;

d mudada loo baahan yahay in lagu helo cadayn dheeraad ah iyo in habsaan ku yimaada ay macquul u tahay dhamaan xaaladaha iyo in kale.

5.12 Haddii labada dhinac ee Baadhitaanka Bar-cabiraad ay ku qanacsan yihiin, dacwad-qaadayaashu waa inay isticmaalaan marxaladda danaha dadweynaha ee Baadhitaanka Buuxa ee Hanaanka oo ku salaysan warbixinaha wakhtiga markaa la joogo la heli karo.

Dib uga fiirsi ku samaynta Baadhitaanka Bar-cabiraad

5.13 Go'aanka ah in xukun loo qaado si hoos imaanaysa Baadhitaanka Bar-cabiraad waa in lagu sameeyaa dib-uga fiirsasho joogto ah. Cadaynta waa in si joogto ah loo qiimeeyaa si loo hubiyo in xukunku weli yahay mid munaasib ah iyo in la sii wado diidmada ah in damiin la ogolaado ay tahay mid sax ah. Baadhitaanka Buuxa ee Hanaanka waa in la isticmaalaa marka ugu horaysa ee ay hawlgal ahaan macquul noqoto, iyo in wixii dhacdo ah ee ah ka hor inta aan mudada maxbuusnimo ee khusaysaa aanay dhammaan ama aanay dhammaan mudada maxbuusnimo ee la kordhiyey.

6 KALA DOORASHO XUKUNNADA

6.1 Dacwad-qaadayaashu waa inay xushaan xukunnada:

a muujinaya weynaanta/khatarnimada iyo baaxadda dembiga ee ay cadayntu taageerayso;

b maxkamadda siinaya awood ku filan oo ay ku xukunto kuna dhaqangeliso amaro munaasib ah oo xukunka ka hor ah; iyo

c inay awoodo in kiiska loo soo bandhigo dariiq cad oo sahlan.

6.2 Tan macnaheedu waa in dacwad-qaadayaasha laga yaabo in aanay had iyo goor dooran ama aanay sii wadin xukunka ugu weyn marka ay kala doorasho jirto.

6.3 Dacwad-qaadayaashu waa in aanay marnaba ku dhaqaaqin xukuno ka badan inta loo baahan yahay, keliya si ay mudaaciga ugu booriyaan inuu qirto fal dembi oo qaar dembiyadaa ka mid ah. Sidaa si leeg, waa in aanay marnaba sii wadin xukun ka weyn keliya si ay mudaaciga ugu booriyaan inuu qirto xukun kaa ka fudud.

6.4 Dacwad-qaadayaashu waa in aanay bedelin xukunka iyadoo sababta ay u bedelayaana tahay go'aankii ay maxkamaddu samaysay ama mudaaciga oo ku saabsan meesha kiiska lagu qaadayo.

6.5 Dacwad-qaadayaashu waa in ay ku xisaabtamaan wixii isbedelo ah ee la xidhiidha wacyiga marka uu kiisku sii socdo xukunka ka bacdi.

7 XAL-GAADHID MAXKAMADDA KA BAXSAN

7.1 Adeegga dacwad-qaadidda waxaa masuuliyaddiisu tahay go'aaminta in digniin shuruudaysan la siiyo dembiile kiisas gaar ah. Kiisaska noocaas ah, Badhitaanka Buuxa ee Hanaanka waa in la buuxiyaa. Dacwad-qaadayaashu waxay bixin doonaan digniin shuruudaysan marka ay tahay talaabo qaadid u qalanta inta uu leeg yahay dembiga la galay iyo cawaaqibkiisa iyo marka shuruudaha la bixinayaa ay buuxinayaan ujeedooyinka tarbiyadayneed, magdhawid ama ciqaabeed ee Sharicaga Cadaaladda Dembiga ee 2003.

7.2 Digniin shuruudaysan maaha xukun dembi laakiin waxay qayb ka tahay qoraalada kaydsan ee dembiilaha ee dembiyada, waxaana laga yaabaa in la daalacdo xiliga dooda maxkamadda ee wixii hanaan-dacwadeed ee ka dambeeya. Waxaa sidoo kale laga yaabaa in dacwad-qaadayaashu xisaabta ku daraan haddii dembiiluhu uu dembi kale sameeyo. Dacwad-qaadayaasha waxaa laga yaabaa inay bixiyaan digniin shuruudaysan marka, ay ka dib markii ay xisaabta ku dareen ra'yiga dulmanaha, ay ka fekereen inay tahay danta eedaysanaha, dulmanaha ama bulshada in sidaa la sameeyo.

7.3 Dacwad-qaadayaashu waa inay raacaan Hanaanka hawlgal ee khuseeya iyo Hagaha DPP ee la xidhiidha siinta Digniin shuruudaysan marka ay go'aaminayaan in dembiile la siiyo digniin shuruudaysan iyo in kale.

7.4 Bixinta digniin shuruudaysan oo la aqbalay, laguna dhaqmay gelaysaa booskii dacwad-qaadid. Haddii digniinta shuruudaysan ee la bixiyey la diido ama eedaysanuhu aanu qirashada dembiga ee loo baahan yahay u sheegin qofka doonaya inuu maarayo digniinta shuruudaysan, dacwad-qaadid waa inay ka dambaysaa, taas oo ah dembigii asalka ahaa. Haddii shurrdaha digniinta shuruudaysan aan lagu dhaqmin, dacwad-qaaduhu wuxuu ka fekeri doonaa danaha dadweynaha, wuxuuna go'aan ka gaadhi doonaa inuu xukun ku qaado dembiilaha. Sida badan, dacwad-qaadid waa in lagu sameeyaa dembigii asalka ahaa.

7.5 Dacwad-qaadayaasha oo keliya ayaa go'aamin kara in la ansixiyo bixinta digniin sahlan, oo la siiyo dembiile galay dembi lagu dhegaysan karo Maxkamadda Sare (Crown Court) oo keliya. Xiliyada ay tani noqon doonto xal munaasib ah waxay noqon doonaan kuwa reeban/inta badan ka soo hadha.

7.6 Dhamaan kiisaska kale, dacwad-qaadayaashu waxaa laga yaabaa inay amraan in la bixiyo digniin sahlan oo waafaqsan CPS iyo Hagaha Xafiiska Arimaha Gudaha, ama soo jeediyaan, tusaale ahaan samaynta Ogaysiis Ganaax qas/Fawdo (Penalty Notice for Disorder). Hase yeeshee, samaynta Ogaysiis Ganaax qas/Fawdo waa go'aan uu booliisku iska leeyahay.

7.7 Dacwad-qaadayaashu waa inay ku qanacsan yihiin in Baadhitaanka Buuxa ee Hanaanka la buuxiyey iyo inay jirto qirasho cad oo dembi oo uu dembiilahu bixiyo kiis walba oo ay ansixiyaan ama ay amraan in booliisku digniin sahlan bixiyo.

7.8 Aqbalidda digniin sahlan ama xal-gaadhid maxkamadda ka baxsan oo kale, taas oo lagu dhaqmo waxay gelaysaa booskii dacwad-qaadid. Haddii digniinta sahlan ee la bixiyey la diido dacwad-qaadid waa inay daba socotaa, taas oo ah dembigii asalka ahaa. Haddii wax xal-gaadhid maxkamadda ka baxsan ah la aqbali waayo, dacwad-qaadayaashu waxay isticmaali doonaan Baadhitaanka Buuxa ee Hanaanku, marka ay kiiska ka helaan booliiska ama dembi-baahdayaasha kale, waxayna go'aamin doonaan in ay dembiilaha dacwad ku qaadaan iyo in kale.

8 DHALLINYARADA

8.1 Marka laga cabirayo sharciga dembiga, qofka dhallinyarada ahi waa qofka 18 sano ka yar.

8.2 Dacwad-qaadayaashu waa inay maskaxda ku hayaan dhammaan kiisaska dhallinyaro ku lug leh in United Kingdom uu yahay mid saxeexay Heshiiskii Qaramada Midoobey ee 1989 ee la xidhiidhey Xuquuqda Ilmaha iyo Heerka Sharciyada Ugu Hooseeya ee Qaramada Midoobey ee 1985 ee Maaraynta Cadaaladda Da'yarta (United Nations 1989 Convention on the Rights of the Child and the United Nations 1985 Standard Minimum Rules for the Administration of Juvenile Justice). Intaa waxaa dheer, dacwad-qaadayaashu waa inay ahmiyad siiyaan ujeedada guud ee hanaanka cadaaladda dhallinyarada, taas oo ah in laga hortago in carruurta iyo dadka da'yarta ahi fal dembi sameeyaan. Dacwad-qaadayaashu waa inay ka fekeraan danaha dhallinyarada marka ay go'aaminayaan in ay tahay danaha dadweynaha in dacwad la qaado iyo in kale.

8.3 Dacwad-qaadayaashu maaha in aanay dacwad qaadin iyadoo sababta keliya ee ay sidaa u samaynayaana tahay cimriga eedaysanaha. Sida uu u weyn yahay/khatar u yahay falka dembi ama hab-dhaqankii hore ee qofka dhallinyarada ah ayaa aad muhiim u ah.

8.4 Kiisaska ku lug leh dhalinyarada waxaa keliya oo badanaa loo gudbiyaa adeegga dacwad-qaadidda si dacwad-qaadid loogu sameeyo, haddii qofka dhalinyarada ah hadda ka hor canaan loo soo jeediyey lana siiyey digniin kama dambays ah, ilaa mooyee falka dembi yahay mid khatar ah/weyn oo aan labadaa midna ku haboonayn ama ilmaha ama qofka dhallinyarada ahi aanu qirsanayn inuu sameeyey falka dembi.

8.5 Canaan u soo jeedinta, digniinta kama dambaysta ah iyo digniinaha shuruudaysan (arag qaybta 7) waxaa loogu talo galay inay hor istaagaan in dembi dib loogu noqdo iyo xaqiiqada ah in fal dembi oo ka dambeeyey dhacayna waxaa laga yaabaa inay muujiso in xalalkaa hore loo sameeyay aanay ahayn kuwo waxtar yeeshay. Danaha dadweynahu waxay inta badan u baahan doonaan in dacwad-qaadid lagu sameeyo kiiska noocaan ah.

9 NOOCA DACWADDA

9.1 Dacwad-qaadayaashu waa inay ahmiyad siiyaan Hagayaasha hadda jira ee Xukun ku qaadidida ee Maxkamadda Hoose (Magistrates' Court Sentencing Guidelines) iyo Jihada Hawl-waxqabadka khusaysa, marka ay maxkamadda u gudbinayaan meesha ay tahay in mudaaciga dacwadda lagu saaro.

9.2 Xawaaraha/degdegu maaha inuu marnaba noqdo sababta keliya ee loo codsanayo in kiis ku sii sugnaado maxkamaddaha hoose. Laakiin dacwad-qaadayaashu waa inay ka fekeraan saamaynta uu daahitaan dhici kara haddii kiiska lagu qaado ama loo diro Maxkamadda Sare (Crown Court), iyo saamaynta suurtogalka ah ee ku imaan karta dulmaha ama markhaatiga haddii kiiska la daahiyo.

Goobaha lagu qabto dacwadaha kiisaska dhallinyaro ku lug leh

9.3 Guud ahaan, dacwad-qaadayaashu waa inay maskaxda ku hayaan inay tahay in dadka dhallinyarada ah dacwadooda lagu qaado maxkamad dhallinyaro, mar kasta oo ay taasi suurtogal tahay. Waa maxkamadda sida ugu wanaagsan loogu qaabeeyey inay daboosho baahiyahooda gaarka ah. Dacwad qof dhalinyaro ah oo lagu qaado Maxkamadda Sare, waa in loo daayaa inay ahaato kiisaska ugu waaweyn ama marka danaha cadaaladdu u baahan tahay in qof dhallinyaro ah si wadajir ah dacwad loogula qaado qof weyn.

10 AQBALIDDA QIRASHO DEMBIILENIMO

10.1 Mudaacigu waxaa laga yaabaa inuu doonayo inuu dembiilenimo u qirto qaar dembiyada ka mid ah laakiin aanu dhamaan qiran. Waxaa kale oo iyana dhici karta inuu doonayo inuu dembiilenimo u qirto dembi kale oo ka duwan, oo laga yaabo inuu ka yar yahay, sababta oo waxay qiranayaan qayb dembiga ka mid ah oo keliya.

10.2 Dacwad-qaadayaashu waa inay keliya aqbalaan qirashada mudaaciga haddii ay aaminsan yihiin in maxkamaddu awooddu awoodo inay samayso xukun u qalma weynaanta falka dembi, gaar ahaan marka ay jiraan arimo wax sii kharibaya. Dacwad-qaadayaashu waa in aanay weligood aqbalin qirasho dembiilenimo iyadoo sababata keliya ee qirashadaasi tahay in ay tahay mid cid danteedu ku jirto.

10.3 Si loo go'aamiyo in qirashada la bixiyey tahay mid la aqbali karo iyo in kale, dacwad-qaadayaashu waa inay hubiyaan in danaha iyo haddii ay suurtogal tahay ra'yiga dulmanaha, ama markii ay munaasib tahay ra'yiga qoyska dulmanaha, xisaabta lagu daro marka la go'aaminayo in aqbalidda qirashadu tahay mid danta dadweynuhu ku jirto iyo in kale. Hase yeeshee, go'aanku wuxuu u yaalaa dacwad-qaadaha.

10.4 Waa in maxkamadda loo cadeeyaa heerka ay qirasho waliba gaadhsiisan tahay iyo sababta loo aqbalay. Marka uu mudaacigu qirto dembiilenimo ah dembiyada, laakiin ay taasi ku salaysnayd xaqiiqooyin ka duwan kiiska dacwad-qaadidda, iyo marka laga yaabo in tani saamayn weyn ku yeelanayso xukunka, maxkamadda waa in lagu booriyaa inay dhegaysato cadaynta si ay go'aan uga gaadho wixii dhacay, ayna markaa xukun qaado iyadoo sidaas ku salaynaysa.

10.5 Haddii uu mudaaci uu hadda ka hor muujiyey inuu maxkamadda weydiin doono inay fal dembi xisaabta ku darto marka ay go'aaminayso xukun, laakiin uu diido inuu qirto falka dembi xiliga maxkamdda la joogo, dacwad-qaadayaashu waxay ka fekeri doonaan in dacwad-qaadid falkaa dembi loogu baahan yahay iyo in kale. Dacwad-qaadayaashu waa inay qareenka mudaaciga iyo maxkamadda u sharaxaan in dacwad-qaadidda falkaa dembi laga yaabo in la mariyo dib uga fiirsi dheeraad ah.

10.6 Taxadar dheeraad ah waa in la sameeyaa marka laga fekerayo qirasho mudaaciga awood u siisnaysa inuu xabsi mudo ugu yar oo khasab ah ka baxsado. Marka qirashada la sameeyo, dacwad-qaadayaashu waa inay sidoo kale maskaxda ku hayaan xaqiiqada ah in amarro kabideed laga samayn karo qaar falalka dembi ka mid ah, laakiin aan qaar kale laga samayn karin.

10.7 Dacwad-qaadayaashu waa inay u hogaansamaan "Hagayaasha Qareenka Guud ee la xidhiidha Aqbalidda Qirashada iyo Doorka Dacwad-qaadaha ee Hawlaha Xukumidda" kaas oo si ka faahfaahsan u qoraya baaxadda masuuliyadaha dacwad-qaadayaal iyo doorka uu ku leeyahay aqbalidda qirasho dembiilenimo.

11 DOORKA DACWAD-QAADAYAASHA EE XUKUMIDDA

11.1 Xukumiddu waa go'aan ay maxkamaddu leedahay, laakiin, dacwad-qaadayaashu waxay leeyihiin waajibaad ah inay gargaar maxkamadda xukunta ka siiyaan inay gaadho go'aankeeda ah xukun munaasib ah iyagoo dareenka maxkamadda u soo jeedinaya arrimaha soo socda:

a wixii arrimo sii adkaynaya ama kuwo sahlaya ah ee lagu soo bandhigo kiiska dacwad-qaadidda;

b wixii Qoraal Shakhsiyeed ee Dulmanuhu bixiyey (Victim Personal Statement);

c markii ay munaasib tahay, cadayn ah saamaynta uu dembigu ku yeeshay bulshada;

d wixii ku deeqid sharci ah, hagayaal xukun, ama kiisas hagayaal ah, kuwaas oo laga yaabo inay caawiyaan; iyo

e wixii ku deeqid sharci ah ee khusaysa ee la xidhiidha amaro kabid ah (sida amaro dhaqanka bulshada dhibka ku ah).

11.2 Dacwad-qaadayaasha waxaa sidoo kale laga yaabaa inay maxkamadda ka caawiyaan inay soo gudbiyaan, iyadoo laga tixraacayo arrimaha kor ku qoran, noocyada xukun ee uu ku jiro dembiga markaa taagan.

11.3 Dhamaan kiisaska dhinacyada badan leh ama marka laga yaabo inay dhacaan is fahan la'aan, dacwad-qaaduhu waa inuu qoraal ku sameeyaa arimaha sii adkaynaya iyo kuwo sahlaya ee uu qori doono marka uu kiiska u sheegayo maxkamadda xiliga dhegaysiga xukunka. Dhamaan kiisaska kale, qaabkan loo wajahayo waa in laga fiirsadaa oo la qaataa haddii ay faa'iido u tahay maxkamadda ama ay faa'iido u tahay in dadweynuhu kiiska fahmo.

11.4 Waa waajibka dacwad-qaadaha inuu dalbado amarro magdhow iyo kabid, sida amarada dhaqanka bulshada dhibka ku ah, amarro hanti kala wareegid ee dhamaan kiisaska munaasibka ku ah. Marka uu ka fekerayo nooca amarro kabid oo uu dalbado, dacwad-qaaduhu waa inuu had iyo goor ahmiyada u hayaa baahiyaha dulmanaha, oo ay ku jiraan su'aasha la xidhiidha badbaado-ilaalintooda mustaqbalka.

11.5 Dacwad-qaadayaashu waa inay ka doodaan wax kasta oo qoraal ah oo uu mudaacigu sameeyo oo fududayn ah oo laga yaabo inay khaldan yihiin, jaahwareerin ama hoos u dhig keenayaan. Haddii uu mudaacigu ku adkaysto qoraalkaas, ayna u muuqato mid khusaysa xukunka, waa in maxkamadda lagu booriyaa inay cadaynta dhegaysato, si ay ogaadaan xaqiiqada oo si waafaqsan xukunka ugu ridaan.

11.6 Dacwad-qaadayaashu waa inay u hogaansamaan “hagayaasha Qareenka Guud ee la xidhiidha Aqballida Odhaahda iyo Doorka Dacwad-qaadaha ee Samaynta Xukunka” kaa oo si ka faahfaahsan u qoraya baaxadda masuuliyadaha dacwad-qaadayaal iyo doorkooda hanaan-hawleedka xukumidda.

12 DIB-UGA FIIRSIGA GO'AANKA DACWA-QAADIDDA

12.1 Dadku waa inay awoodaan inay ku kalsoonaadaan go'aanada uu sameeyo adeegga dacwad-qaadidda. Caadiyan, haddii adeegga dacwad-qaadidda uu eedaysane ama mudaaci u sheego in aanad jiri doonin dacwad-qaadid, ama in dacwad-qaadiddii la joojiyey, kiisku mar kale ma bilaaban doono. Laakiin marmarka qaarkood waxaa jira sababo gaar ah oo adeegga dacwad-qaadiddu ay ku bedeli doonto go'aan ah in aan dacwad la qaadin ama in kiiska loogu halwlgalo dariiq ah xal-gaadhid maxkamadda ka baxsan ama xiliga ay dib u bilaabi doonto dacwad-qaadidda, gaar ahaan haddii uu kiisku khatar yahay.

12.2 Sababahaas waxaa ka mid ah:

a kiisas naadir ah, kuwaas oo u fiirsi cusub oo lagu sameeyey ga'aankii hore muujiso in uu ahaa mid khalad ah, si loo ilaaliyo kalsoonida loo hayo hanaanka cadaaladda, dacwad-qaadid waa in la sameeyaa xitaa iyasoo uu go'aan hore dhacay;

b kiisaska la joojiyey si loo ururiyo oo loo diyaariyo cadayn ka badan oo ay u badan tahay in la helayo mustaqbalka dhow. Kiisaskaa iyaga ah, dacwad-qaadahu wuxuu mudaaciga u shaeegi doonaa in laga yaabo in dacwad-qaadiddii dib loo bilaabo;

c kiisaska la joojiyey sababtoo ah cadayn la'aan, laakiin ay mar dambe soo baxeen cadaymo wax-ku-ool ah; iyo

d kiisaska dhimasho ku lug leh, kuwaas oo dib-uga fiirsi ka dambeeyey xogtii la soo ururiyey uu ku soo gabagaboobey in dacwad-qaadid la sameeyo, iyadoo aan loo eegayn go'aankii hore ee ahaa inaan dacwad la qaadin.

12.3 Waxaa sidoo kale laga yaabaa inay jiraan kiisas kale oo ka soo hadha, kuwaas oo daba socda dembi-ku-waayid fal dembi oo weyn, waxaa laga yaabaa in dacwad-qaaduhu, isagoo ay weheliso ogolaansho qoraal ah oo ay bixiyeen DPP, ay Maxkamadda Rafcaanka (Court of Appeal) ka dalbadaan in la joojiyo dembi-ku-waayidda ayna codsadaan in mudaaciga mar kale dacwad lagu qaado.

Kani waa dukumeenti dadweyne.

Nuqulo dheeraad ah oo dukumeentigaan ah iyo warbixino ku saabsan luuqadaha iyo qaababka kale ayaa laga heli karaa:

CPS Communication Division
Rose Court
Southwark Bridge
London SE1 9HF

Iimayl: publicity.branch@cps.gsi.gov.uk

Wixii macluumaad ku saabsan Adeegga Dacwad-qaadidda Maxkamadeed, iyo daalacashada ama internet kala soo baxid nuqul elektroonik ah oo dukumeentigaan ah, fadlan booqo boggayaga internet-ka:

www.cps.gov.uk

CPS Policy Directorate
© Crown Copyright 2010